

**Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyada lamba. 142 ee 3 Juun 1968**

**Heshiiska Cilmi Baarista ee Dowlaada Somaliya iyo Hey'aadda Baarista Afrika ee London**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Kadib markii la arkay qod.75 ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay Heshiiska taarikhdiisa 24; Maarso 1968 ee ku dhexeya Dowladda Somaliya iyo Hey'aadda Baarista Afrika ee London, oo daliyey xilka hey'aadda in ay ku dhaqaaqdo howlaha ku tilmaaman Heshiisa iyo dhinaa Dowladda Somaliya in ay taakuleyaan hey'adasi oo wakiil ka ah Guddomiyaha Mud. J.G.S. Drysdale lacagta dhan Sh. So, 100.000 (Boqol kun) ilaa iyo muddo hal sano ah;

Kadib markii la tixgeliyey fursada in la dhaqaajiyo saxiixinta heshiiskaan;

Kadib markii la dhegeysta soo jeedinta Golaha Wasiirka;

Kadib markii la tixgeliyey aragtida Rai'sul Wasaaraha.

**WAXAA LA SOO SAARAY**

**Qod. 1**

1. Waxaa la ansixiyey lana fuliyey Heshiiskaan la saxiixay 24 Maarso 1968 ee Wakiilaka Jamhuuriyadda Somaliya Safiir Ahmed Jama Abdulleh oo dhinac ah iyo Hey'dda Baarista Afirka ee London oo ah dhinaca kale oo metelaaya Guddomiyaha Mud. J.G.S. Drysdale;
2. Kharaj la xiriira Sh.So, 100.00 (boqol kun) oo loogu tala galay hey'aadda sare ku xusan waxaa la dhigi doonaa Qeybta 3, cutubka 2- 10- 36 ee Guddoonka Golaha Wasiradaha sanad maliyeedka 1968 iyo cutubyada la xiriira sanadyada kale ee xig-xiga.

Muqdisho, 3 Juun 1968.

**Abdirashid Ali Shermarke**

Rai'sul Wasaaraha

**Mohamed Haji Ibrahim Egal**